



Khidmadaha caafimaadka

Marka aad hesho daryeel caafimaad, qarash ayaad bixinaysaa. Inta qarashku leegaanayo waxay ku xidhantahay nooca daryeelka ee la bixiyey iyo haddii lagugu daryeelay xarun xannaano caafimaaad ama isbitaal. Sharciyo kala duwan ayaa quseeya booqashada iyo haddii aad ku jirto isbitaalka.

Ku bixi kaadh-bangi ama ku xidhan nadaamka autogira-da, si dhammaan kharaashkaaga daryeelka caafimaadka ee Landstinget-ka si toos ah looga jaro akoonkaaga. Waxa kale oo aad ku bixin kartaa warqadda qaan-sheegadka oo laguugu soo dirayo guriga. Kaash ku bixintu waxa ay joogsatay 1 maarso 2010.

Waxa jira xad aanu dhaafi karin qarashka aad u baahantahay in aad ku bixiso booqashada caafimaadka muddo 12 bilood gudahood ah. Difaaca qarashka badani waa 900 karoon gobolka Östergötland. Marka aad bixiso 900 karoon waxa lagu siinayaa kaadh bilaash ah oo quseeya inta ka dhiman 12-ka bilood. Qarashka maalinlaha ah ee marka lagu dhigo isbitaalka kuma jirayo kaadhka bilaashka ah. Waxa kale oo aan ku jirin khidmadaha kontoroolka caafimaadka, tallaalada, waraaqaha caddaymaha ah iyo uur iska baadhida.

Kaadhka bilaashka ah

Si aad u hesho kaadhka bilaashka ah waa in qarashaadkaagu ku shaambadaysnaadaan kaadhka qarashka badan ama aad sidato rasiidhadii lacagaha aad bixisay. Markasta oo aad bixiso qarash bukaan waa in aad codsato in lagu shaambadeeyo kaadhka qarashka badan. Waxa kale oo aad kaydsan kartaa rasiidhada. Waa in aad adigu ilaashato xaq u lahaanshahaaga kaadhka bilaashka ah.

Qayb-qayb u bixin

Waxa aad dooran kartaa in aad qaybqayb u bixiso qarashaadkaaga bukaanka ee caafimaadka furan. Waxa aad qaybqaybin kartaa qarashaadkaaga si aad kaadh bilaash ah (900 kr) ugu hesho 6 bilood ama 9 bilood. Markaa kaadhka bilaashka ah waxa aad toos uga helaysaa xarunta xannaanada caafimaadka ama qaabilaadda marka aad saxeeexo heshiiska ku saabsan qaybqayb u bixinta.

Xasuusnow wakhtigaagii kuu ballansanaa

Dhammaan xarumaha xannaanada caafimaadka ee Östergötland lacag ayey ka qaadaan booqashooyinka baaqda. Haddii aad wakhti ku lahayd xarun xannaano-caafimaad oo aad iman weydo waxa boosta kaaga soo dhacaya qaan-sheegad ah 150 karoon. Booqasho baaqataa waxa ay mar kasta la macno tahay in qof kale oo bukaan ahi wakhtigaas heli lahaa laakiin uu wakhti dheer sugi doono. Haddii ay jiraan xaalado khaas ah oo aad u iman kari wayday tixgelin ayaa la siinayaa.

Dawo

Sidoo kale waxa jira difaaca qarashka badan ee dawada. Waxa aad ku bixinaysaa dawooyinka dhakhtarku kuu qoray ugu badnaan 1800 karoon 12kii biloodba. Warbixin dheeraad ah waxa aad ka heli kartaa farmasiiga.



Khidmadaha bukaanka ee soo gelaya difaaca qarashka badan (sharci aasaasi ah)

Khidmadda la kulanka dhakhtarka:

- xarunta xannaanada caafimaadka 150:-
- Waxa lagu darayaa Guri ku booqashada 50:-

- Isbitaal 300:-
- Booqashada ka soo gudbinta ugu horraysa ee caafimaadka dhow 150:-
- Baadhitaanka qallinka ka horeeya ee caafimaadka furan 300:-

- Talobixin telefoon/rasiid dawo 0:-

- dhakhtar gaar ah oo ay landstinget lacag siiso 150:-/300:-
 - Talobixin telefoon/rasiid dawo 0:-

- Carruurta iyo dhalinyarada ka yar 20 jir 0:-

- Daryeelka sida uu dhigayo sharciga ka hortagga cudurada faafa/STD 0:-

Khidmadaha dhakhtarka jimicsiga iyo waxqabadyada kale ee daryeellada caafimaadka:

- kalkaalisada degmada 100:-
- shaybaarka halkii dhakhtar la aadi lahaa bedelkiisa 100:-

- Dhakhtarka jimicsiga iyo dhakhtarka dhaqdhaqaaqa jidhka 100:-

- Dhakhtarka jimicsiga dhabarka (kiropraktor)/ duugista (naprapat) marka uu jiro heshiis caafimaad: 200:-
- shaqaalaha caafimaadka ee kale 100:-

- Carruurta iyo dhalinyarada ka yar 20 jir 0:-

Qoraalka ku saabsan daryeelka ilkaha waxa ku xusan in qaybo ka mid ah kharaashka daryeelka ilkaha ay soo gelayaaan difaaca qarashka badan.

Qarashaadka aan soo gelahayn difaaca qarashka badan

Qarashka isbitiaal ku daryeelka Avgift för sjukhusvård:

- Qofka la dhigo Isbitaalka ee ka weyn 20 jir laakiin ka yar 65 jir, waxa uu bixinayaa 80 kr maalintiiba.
- Qofka buuxiyey 65 jir waxa uu bixinayaa 50 kr maalintii
- Haddii lagugu daweeeyey isbitaalka Eksjö ama Västervik oo aad bixisay qarash ka badan kii aad ku bixin lahayd Östergötland waxa lagu soo celin karaa faraqa u dhexeeya. Soo celinta kala xidhiidh xafiiska safarrada bukaanka.



Landstinget

i Östergötland

Avgifter i sjukvården/SOM

Kontoroollada caafimaadka:

- baadhitaanka naasaha iyo shaybaadhka macdanta dumarka: 140:-

Baadhitaanka uurka:

Qarash ayaa la iskaga qadayaa xiita xarunta xannaanada hooyooyinka: 100:-

Tallaalada, warqaha caddaymaha ah iwm:

Waa qiimaha caadiga ah